

Diiwaanada City of Seattle iyo King County waxay muujinayaan inaad leedahay tagasi ama baabuur kiro ah oo leh ogolaanshaha u shaqaynta sidii tagsoi laakiin ogolaanshahaas hadda laga laabtay, laga noqday, ama haddii kale uu haysto Agaasimaha.

Sanadkii 2023, City of Seattle iyo King County mid walbaa waxay ansixisay sharci lagu casriyeynayo laguna hagaajinayo sharciyada nidaaminaya gaadiidka kirada ah. Sharcigu wuxuu u sameeyay habraaca mulkiilaha gaariga loo ansixiyay inuu u shaqeeyo sida tagsiga inuu si mudo gaaban ah u joojio ogolaanshaha u ogolaanaya mulkiilaha gaariga inuu ka qaado baabuurka adeega oo uu badbaadiyo kharashaadka hawlgalka sida caymiska iyo shidaalka. Fadlan eeg sharciga Magaalada iyo Degmada ee joojinta ogolaanshaha ee ku mudada gaaban ah (<https://tinyurl.com/2fxpa53t>) wixii macluumaad dheeraad ah.

Ogolaanshaha tagasi ee lala laabtay, laga noqday, ama haddii kale uu hayo Agaasimaha kadib Janaayo 31, 2015, iyo kahor Sebteembar 1, 2024, waxaa si ku meel gaar ah u joojin doona Magaalada iyo Degmo marka la gaaro Sebteembar 1, 2024. Xiritaanka mudada gaaban ah waxay socon doontaa 12 bilood (ilaa Agosto 31, 2025). Waxaa sida adag lagugu dhiirigalinayaa inaad sida ugu dhakhsaha badan talaabo u qaado.

Laga bilaabo Sebteembar 1, 2024, ikhtiyarada soo socda ayaa lagu heli karaa:

1. **Dib usoo furo** ogolaanshaha tagsiga adiga oo bixinaya khidmada dib u cusboonaysiinta ogolaanshaha tagsiga.
 - Ma bixinaysid khidmadaha ruqsada sanadihii la soo dhaafay ama khidmadaha ruqsada la daahiyay ama kharashka dheeraad ah ee adeegyada la heli karo ee kursiga curyaanka.
 - Iyada oo ku xiran xaalada ansixinta tagsiga, habraaca dib u soo furashada waxay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood in la dhamaystiro.
2. **U wareeji** ogolaanshaha tagsiga qof kale.
 - Iyada oo ku xiran xaalada ansixinta tagsiga, habraaca wareejintu waxay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood in la dhamaystiro.
3. **Wax samee** oo ogaysii Magaalada iyo Degmada inay la laabtaan ogolaanshaha tagsiga.
 - Kala laabashada ogolaanshaha tagsiga waa mid rasmi ah, mana heli doontid wax codsi sharci ah.

Ogolaanshaha tagsiga ee ay Magaaladu kugu siisay si bakhtiyaanasiib ah 2015, 2016, 2017, ama 2018, mulkiiluhu ayaa dib u codsan karaa ogolaanshaha haddii ogolaanshaha lagala noqdo, laga laabtay, ama haddii kale uu hayo Agaasimaha kahor intaanu dhammaystirin mudada saddexda sano ah ee ku meel gaarka ah ee looga baahan yahay ogolaanshaha cusub. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay Magaaladu dib u siisay ogolaanshaha mulkiile cusub, markaas kadib ogolaanshaha dib uma soo ceshan karo mulkiilihii hore.

Haddii aad qorshaynayso inaad wareejiiso ama kiraysato ogolaanshaaga, fadlan tixgali inaad isticmaasho badalitaanka ogolaansha ka shaqaynta tagasi ee barta kingcounty.gov/medallion, aalad cusub oo kaa caawinaysa kulmitaanka dadka iibinaya iyo kuwa iibsanaya ogolaanshaha ku shaqaynta tagsiga.

Haddii ogolaanshahaaga ku shaqaynta ay la xiriirto baabuur la kireeyo, fadlan ogow in nidaamka ogolaanshaha baabuurka kirada ah uu dhamaan doono Maarso 31, 2026. Ogolaansho kasta ee ku shaqaynta tagsi ee baabuur kira oo sii jira waa in loo badalaa ogolaansha tagsinimada kahor taariikhdaas. Ma jiraan khidmado badalitaan oo dheeraad ah. Habraaca badalitaanka waxaa lagu bilaabay iyadoo la isticmaalayo foomka laga heli karo <https://tinyurl.com/2pahh7yb>.

Hadii aad qabto su'aalo, oo ay kamid yihiin xaalada ansixitaanada tagsiga, fadlan kala xiriir adeega macmiilka lamarka 206-386-1267 ama iimaylka taxicab@seattle.gov wixii caawimaad dheeraad ah. Waa ku mahadsan tahay feejignaanta aad siisay arintan.